## Ma u baahan tahay warqad codbixin beddelaad ah?

Haddii warqaddaada codbixinta ay dhunto ama xumaato, waxaad daabacan kartaa mid beddelaad ah adigoo isticmaalaaya Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka (Online Ballot Marking Program, OBMP). Isticmaalka OBMP, waxaad ku heli kartaa oo aad daabacan kartaa warqad codbixin beddelaad ah adigoo jooga guriga, maktabadda, ama meel walba oo ku habboon.

OBMP waxaa loogu talagalay inuu u oggolaado codbixiyeyaasha naafada ah, oo ay ku jiraan kuwa indhooleyaasha ah ama uu araggoodu hooseeyo, inay warqaddooda codbixinta si qarsoodi ah u calaamadaystaan. Waxaa heli kara dhammaan codbixiyeyaasha diiwaan gashan.

**Sida loo isticmaalo Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka**

- Tag halka kingcounty.gov/elections/obmp.
- Macluumaadkaaga geli foomka.
- Ku calaamadee dookhyadaada warqadda codbixinta oonleenka oo ka dibna daabac warqaddaada codbixinta ee aad buuxisay.

AMA

- Daabac warqaddaada codbixinta oo ka dibna gacanta ku calaamadee.
- Hubi in warqaddaada codbixinta si sax ah aad u calaamadaysay.
- Ku soo celi warqaddaada codbixinta sida caadiga ah, halka sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ama adoo soo marsiinaaya boostada.

Lacagta boostada looma baahna haddii aad isticmaasho xaashida lifaaqa bakhshadda ee la socota marka aad daabacayso warqaddaada codbixinta.

## Nala soo xiriir si aad u hesho buug-yarahaan oo qaab kale ah.

Contact us to receive your voting materials in Chinese, Korean, Russian, Somali, Spanish or Vietnamese.

如需獲取您的中文投票資訊，請與我們聯絡。

**한국어로 투표 자료를 받으시려면 저희에게 연락하세요.**

Свяжитесь с нами, чтобы получать материалы для голосования на русском.

Nala soo xiriir si aad u hesho agabkaaga codeynta oo ku qoran Af-Soomaali.

Comuníquese con nosotros para recibir sus materiales de votación en español.

Xin vui lòng liên lạc với Sở Bầu cử Quận King để nhận tài liệu bầu cử bằng tiếng Việt.




**Haddii aad u baahan tahay caawinaad dheeraad ah ama hab kale oo aad u dhiibato warqaddaada codbixinta, fadlan kala xiriir xafiiskeena halka 206-296-VOTE (8683).**



Doorashada Gaarka ah ee Abriil 22, 2025

# Degmada King Buug-yaraha Codbixiyeyaasha Deegaanka ee Rasmiga ah

sida ay codsadeen Degmada King iyo Degmada Dugsiga Mercer Island Lr. 400

## Saxiixo si aad u hesho digniimaha warqadda codbixinta!

Hel qoraallo taleefan ama iimeelyo ah marka warqaddaada codbixinta la sii habeynaayo oo la tiriyo. Iska qor halka **kce.wiki/TrackMyBallot**.

## Is diiwaan geli si aad u codeyso

**Oonleenka:** Booqo **VoteWA.gov** si aad oonleenka iskaga diiwaan geliso oo aad u codeyso. Wakhtiga kama dambeysta ah ee is diiwaan gelinta oonleenka ee ku aaddan Doorashada Gaarka ah ee Abriil waa Abriil 14.

**Boostada:** Ka soo degso oo daabaco foomka diiwaan gelinta halka **kce.wiki/VoterReg** oo boostada ugu dir Doorashooyinka Degmada King: **919 SW Grady Way, Renton, WA 98057**. Waa in la helaa ugu dambeyn Abriil 14.

**Shakhsi ahaan:** Waxaad shakhsi ahaan iskaga diiwaan gelin kartaa halka xarunta guud ee Doorashooyinka Degmada King ilaa iyo Abriil 22, Maalinta Doorashada. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan saacadaha iyo adeegyada waxaad ka heli kartaa halka **kingcounty.gov/elections**.

## Doorashadaan, waxaad haysataa fursado!

**Doorashadaan oo keliya, waxaad aqoonsigaaga ka xaqiijin kartaa oonleenka!**

Ma doorbidaysaa inaad saxiixdo? Taasina waa suurtagal. Waxaad u baahan tahay oo keliya inaad samayso midkood.

Booqo **kce.wiki/verify** oo raac tilmaamaha oonleenka.

**Ma u baahan tahay caawinaad?** Nagala soo xiriir 206-296-VOTE (8683) ama elections@kingcounty.gov.

**kce.wiki/verify**

## Barro wax dheeraad ah oo ku saabsan sanduuqyada lagu rido, xarumaha codbixinta, iyo in ka badan!




**Waxaan halkaan u joognaa in aan caawino!**

Shaqaalaha doorashooyinka ayaa kaa caawini kara inaad is diiwaan geliso oo aad hesho warqad codbixin cusub ilaa iyo Maalinta Doorashada. Ma u baahan tahay warqad codbixin beddelaad ah oo ma rabtaa inaad si gaar ah u calaamadayso warqaddaada codbixinta? Ka hel warqaddaada codbixinta oonleenka barta **kingcounty.gov/elections/obmp** si aad uga faa'iidaysato Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka.

**Warqaddaada codbixinta waxaa ku duuban macluumaad muhiim ah oo ku saabsan sida loo soo celiyo warqaddaada codbixinta, helitaanka caawinaadda, iyo wax dheeraad ah. Iska xaqiiji inaad lifaaqa warqaddaada codbixinta ka eegto:**

- Shanta sanduuq ee lagu rido warqadda codbixinta ee kuugu dhow
- Halkee laga heli karaa caawinaad shakhsi ahaanneed
- Sida loo daabaco warqaddaada codbixinta haddii taada lunto ama burburto.

## Yaa deeq ku bixiya ololeyaasha?

Eeg ku-deeqeyaasha musharaxiinta iyo cabbirrada sharciga ee gobolka iyo deegaanka:

Guddiga Kashifaadda Dadweynaha
www.pdc.wa.gov | Wicitaanka Lacag La'aanta 1-877-601-2828

206-296-VOTE (8683)
elections@kingcounty.gov
kingcounty.gov/elections

Baraheena Bulshada
@kcelections

King County Elections

codeyn!

Soo Jeedinta Lr. 1

## Canshuurta Nidaam Goboleedka Aqoonsiga Sawirka Faraha ee Otomaatigga ah (AFIS)

Golaha Degmada King ayaa ansixiyay Xeerka Lr. 19884 ee khuseeya soo jeedintaan la xiriirta canshuurta nidaam goboleedka aqoonsiga sawirka faraha ee otomaatigga ah (AFIS). Soo jeedintaan waxay maalgelin doontaa sii wadidda hawlgalka barnaamijka AFIS si loo bixiyo teknolojiyad iyo adeegyo casri ah oo lagu baaro sawirka faraha iyo calaacasha si ay gacan uga geystaan maamulidda caddaaladda. Waxay oggolaanaysaa canshuur hanti dheeraad ah oo muddo toddoba sanno ah laga bilaabo 2026 oo ah $0.0275 ka mid ah $1,000 ee qiimeynta la qiimeeyay, iyadoo la adeegsanayo caddadka canshuurta ee 2026 si loo xisaabiyo xaddidaadyada ku xusan Cutubka 84.55 RCW ee ku aaddan canshuuraha ku xiga ee sannadaha 2027-2032, lagana dhaafayo waayeellada, halyeeyadii hore, iyo dadka naafada ah ee u qalma sida ku xusan RCW 84.36.381. Ma tahay in soo jeedintaan la:

Ansixiyo

Diido

*Qoraalka cabbirkan oo dhammaystiran ayaa laga heli karaa laga bilaabo bogga 5-aad.*

!

Waxaad u codeynaysaa inaad **Ansixiso ama Diido** Soo Jeedinta Lr. 1

*Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (RCW 84.55.050)*

## Bayaanka sharaxaadda

Soo jeedintaan waxay Degmada King dib ugu oggolaan doonta in ay soo rogto canshuurta hantida caadiga ah oo dheeraad ah si loo taageero sii wadidda hawlgalka iyo kor-u-qaadidda barnaamijka nidaam goboleedka aqoonsiga sawirka faraha ee otomaatigga ah (AFIS) waxayna beddeli doontaa canshuurtii ay ansixiyeen codbixiyeyaasha ee wakhtigeedu dhammaaday 31-ka Diseembar, 2024. Barnaamijka AFIS waxaa loogu talagalay in lagu horumariyo awoodda hey'adaha sharci fulinta ee Degmada King gudaheeda si ay gacan uga geystaan maamulidda caddaaladda. Waxyaabaha kale waxaa ka mid ah, barnaamijka AFIS waxaa uu bixiyaa adeegyo iyo teknolojiyad casri ah oo lagu baaro aqoonsiga sawirka faraha iyo calaacasha.

Canshuurta la soo jeediyay waxaa loo ansixin doonaa muddo toddoba sanno ah, iyada oo ururinta ay bilaaban doonto 2026. Inta lagu jiro sannadka koowaad, canshuurta waxaa lagu soo rogi doonaa heer dhan 2.75 senti ($0.0275) ama ka yar ee ka mid ah kunkii doolar ($1,000) ee qiimeynta la qiimeeyay ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada King. Tusaale ahaan, guri lagu qiimeeyay $885,000 sannadka 2026, waxa uu bixin doonaa caddadka canshuurta oo ah ugu badnaan $24.34 sannadka koowaad. Kordhinta sannadlaha ah ee lixda sanno ee ku xiga ayaa lagu xaddidi doonaa heerka sharciga ah ee lagu qeexay cutubka 84.55 RCW. Waayeellada, halyeeyadii hore, iyo kuwa naafada ah ee u qalma ayaa xaq u yeelan doona in laga dhaafo canshuurtaan sida ku xusan RCW 84.36.381.

Soo Jeedinta Lr. 1 waxay sii wadi doontaa jiritaanka Guddiga La-talinta AFIS-ka.

**Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:**

**Mike Leahy**
Maamule Goboleedka AFIS
(206) 263-2750
michael.leahy@kingcounty.gov



## Bayaanka lagu taageerayo

Patti Cole-Tindall, Pete von Reichbauer, Jon Schuldt
yesforAFIS2025@gmail.com

Ku dhawwaad muddo 40 sanno, Nidaam Goboleedka Aqoonsiga Sawirka Faraha ee Otomaatigga ah (AFIS) ee Degmada King wuxuu ahaa qalab baaris oo lagama maarmaan u ah dagaalka looga soo horjeedo dambiyada. AFIS wuxuu door muhiim ah ka ciyaaray xallinta kiisaska kala duwan laga bilaabo dambiyada rabshadaha wata ilaa iyo jabsashada, oo codkaaga haa ahna wuxuu sii wadi doonaa awoodda in dhibaneyaasha iyo qoysaskooda la siiyo gabagabayn.

Iyadoo la adeegsanayo teknolojiyad casri oo isbarbardhig ah, AFIS wuxuu hubiyaa in la helo aqoonsiga saxda ah si dhaqso leh ee dadka lasoo xiray, codsadeyaasha, iyo tuhmaneyaal dambiyeedka. Maadaama uu yahay barnaamij lagu maalgeliyo heer goboleed, dhammaan hey'adaha sharci fulinta ee Degmada King waxay si wadajir ah u wadaagaan helitaanka adeegyadaan baarista oo qiimo jaban ah marka loo eego haddii ay iyaga si gaar ah u maalgelin lahaayeen.

Barnaamijka AFIS wuxuu muujiyay maamul maaliyadeed oo mas'uul ah, wuxuuna iyada oo loo maraayo maamulid dhaqaale oo taxaddar leh, awooday in canshuurtii lixda sanno ahayd uu sii dheereeyo hal sanno oo dheeraad ah. Guushaan waxay caddeynaysaa in barnaamijku si hufan u adeegsado kheyraadka oo laguna aaminni karo qaybinta doolarkeena canshuurta.

Ku codeynta haa si dib loogu cusboonaysiiyo canshuurta AFIS waa maalgelin lagu samaynayo bulsho ammaan ah. Waxay taageertaa qalab la caddeeyay inuu xoojiyo baaritaanka dambiyada, hubiyo dedejinta xallinta kiisaska, isla markaana kor u qaado dareenka nabadgelyada ee dhammaan deganeyaasha. Aan sii wadno ka faa'iidaysiga barnaamijkan lama huraanka ah oo aan taageerno caddaaladda gudaha Degmada King. Fadlan, ku codee haa ee Soo Jeedinta 1-aad.

## Bayaanka looga soo horjeedo

Wax bayaan ah lama soo gudbin.

Bayaanka lagu taageerayo ama ka soo horjeeda cabbirka ama hindisaha warqadda codbixinta waxaa soo gudbiya guddiyo ay magacaabeen maamulka xukunka. Ma jirin cid u soo baxday inay ka mid noqdaan guddiga iyo inay qoraan bayaan mucaaradnimo. Haddii aad jeclaan lahayd inaad mustaqbalka la shaqeyso guddi fadlan la xiriir maamulka xukunka.

Degmada Dugsiga Mercer Island Lr. 400

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Soo Jeedinta Lr. 1

# Curaarta Casriyaynta Xarumaha Dugsiga, Horumarinta Ammaanka iyo Kor-u-qaadidda Waxbarashada

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Mercer Island Lr. 400 ayaa hirgeliyay Qaraarka Lr. 736, ee khuseeya soo jeedin si loo bixiyo xarumo casri ah oo ammaan ah, si kor loogu qaado waxbarashada. Soo jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay: dib u dhisto oo ay casriyayso qayb ka mid ah Dugsiga Dhexe ee Islander (dhismaha qayb lagu daro oo mideynaysa dugsiga, ku daritaanka fasallada/STEM/shaybaarrada robotikiska, casriyaynta HVAC); dib u habeynta qaybo ka mid ah Dugsiga Sare ee Mercer Island (casriyaynta HVAC, digniimaha dabka, helitaanka ADA, casriyaynta fasallada, Xarunta Bandhigga Farshaxanka); casriyaynta helitaanka halka xarumaha Degmada; bixinta $165,000,000 oo ah curaarta waajibaadka guud oo ku buuxsamaya 20 sanno gudahood; iyo canshuur ku soo rogista canshuuraha hantida ee xad dhaafka ah si dib loogu bixiyo curaarta, dhammaan sida lagu sheegay Qaraarka Lr. 736. Ma tahay in soo jeedintaan la:

Ansixiyo

Diido

***Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.***

!

Waxaad u codeynaysaa inaad
**Ansixiso ama Diido**
Soo Jeedinta Lr. 1

*Shuruudaha ansixinta: 60% codeyn haa ah iyo soo bixitaanka ugu yaraan 40% ee codbixiyeyaashii dhiibtay warqadaha codbixinta doorashadii guud ee ugu dambeysay (Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(b))*

## Bayaanka sharaxaadda

Soo Jeedinta 1-aad waxay oggolaanaysaa curaarta dhismaha dugsiyada si dib loogu dhiso, loo casriyeeyo, loona dayactiro dugsiyada sii duqoobaya waxbarasho ahaanna aan casri ahayn. Soo Jeedinta 1-aad waxay horumarin doontaa badqabka iyo amniga ardayga, shaqaalaha iyo bulshada, waxay horumarinaysaa oo balaarinaysaa fursadaha waxbarasho iyo barnaamijyada, waxayna bixinaysaa jawi waxbarasho oo sugan, caafimaad leh, iyo casri ah si loo daryeello dhammaan isticmaaleyaasha.

Soo Jeedinta 1-aad waxay dib u dhis iyo casriyayn ku samayn doontaa qayb ka mid ah Dugsiga Dhexe ee Islander, oo ay ku jiraan: dhismaha qayb lagu daro oo mideynaysa dugsiga oo leh xarun isku xiran; kordhinta fasallada iyo STEM iyo shaybaarrada robotikiska; casriyaynta HVAC iyo samaynta casriyaynta kale ee jawiga waxbarashada iyo waxtarka tamarta; midaynta albaabka laga galo dhismaha iyo casriyaynta barxadda dhexe oo leh gelitaan ilaalisan oo ku aaddan badqabka iyo amniga; hagaajinta goobta isku imaatinka ardayda; iyo balaarinta goobta bandhigga farshaxanka.

Soo Jeedinta 1-aad waxay dib u habeyn ku samayn doontaa qaybo ka mid ah Dugsiga Sare ee Mercer Island, oo ay ku jiraan: casriyaynta nidaamyada HVAC iyo digniimaha dabka; rakibidda marin ay heli karaan ADA-ga oo isku xirta qaybaha 300 iyo 400; casriyaynta fasallada iyo xarumaha waxbarashada ee qaybaha 200 iyo 300; dib u habeynta barxadaha dugsiga si looga dhigo goobo waxbarasho oo la isticmaali karo; abuurista meel waxbarasho iyo shirar wadajir ah oo loogu talagalay ardayda iyo taageeridda waxbarashada; dib u habeynta iyo casriyaynta musqulaha dhismeyaasha iyo garoonka; horumarinta goobaha guud ee isku imaatinka, dukaanka ardayda iyo la-talinta xirfadda; iyo casriyaynta Xarunta Bandhigga Farshaxanka.

Soo Jeedinta 1-aad waxay casriyayn doontaa helitaanka xarumaha kale ee Degmada, oo ay ku jiraan rakibidda nidaamyada badqabka nolosha iyo xarumo iyo kaabayaal ay heli karaan ADA-ga.

$165,000,000 ee curaarta waajibaadka guud waxa dib loogu bixin doonaa canshuurta hantida sannadlaha ee xad dhaafka ah oo ku filan in lagu bixiyo adeegga deynta curaarta inta lagu guda jiro ugu badnaan muddo 20 sanno ah. Ka dhaafitaanka canshuuraha ayaa laga yaabaa in la heli karo, wac Waaxda Qiimeynta Degmada King, 206.296.3920.

**Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:**

**Dr. Fred Rundle**
Kormeeraha Guud
(206) 236-3300
fred.rundle@mercerislandschools.org

## Bayaanka lagu taageerayo

Frank Schott, Leslie Ferrell, Samantha Rubenfield
www.yesmischools.org

Dugsiyada Mercer Island waa kuwo aad u wanaagsan, balse dhismeyaashu ayaa duqoobaya. Curaarta la soo jeediyay waxay maalgelinaysaa: $100 milyan oo loogu talagalay Dugsiga Dhexe ee Islander (oo la dhisay 1961) si kor loogu qaado goobaha waxbarashada iyo in la sameeyo casriyaynta muhiimka ah ee amniga iyo badqabka; $64 milyan oo loogu talagalay Dugsiga Sare ee Mercer Island (1957) si loo fuliyo horumarinnada maalgelinta lagama maarmaanka ah; $1 milyan oo lagu horumarinayo qorshaha maalgelinta 3 dugsi hoose: Lakeridge (1953), Island Park (1956) iyo West Mercer (1964).

Curaartaan waxay canshuur bixiyeyaasha ugu kici doontaa $0.45 ka mid ah $1,000 ee qiimeynta la qiimeeyay ama $450 sannadkii ee halkii $1 milyan ee qiimeynta la qiimeeyay. *Haddii cabbirka curaarta la ansixiyo, canshuuraha dugsiyada Mercer Island waxay ahaan doonaan kuwo 20-60% ka hooseeya canshuuraha degmooyinka dugsiga ee deriska la ah.*

Degmada Dugsiga Mercer Island waxay curaartaan u diyaarisay iyada oo la helay talooyin balaaran oo ka yimid shirkad naqshadaynta dhismeyaasha oo la shaqeynaysay MISD (Mercer Island School District) in ka badan muddo 20 sanno, laba sanno oo qorsheyn ah oo ay la yeelatay Guddiga Qorshaha Xarumaha Muddada Dheer, iyo shan kulan oo dadweyne ah. In kasta oo qorshaha la soo jeediyay uusan daboolin dhammaan waxyaabaha ay bulshadu codsatay, *Guddiga wuxuu si wadajir ah oo cod aqlabiyad 5-0 ah ku ansixiyay qorshahaan mashruuca maalgelinta ee cabbirka suubban.*

Baahida loo qabo horumarinnada maalgelinta ee muddo dheer dib loo dhigay ma baabi'i doonto *oo keliya waxay sii noqon doontaa mid aad uga qaalisan haddii dib loo dhigo. Haa* ugu codee horumarkaan muhiimka ah.

## Bayaanka looga soo horjeedo

Mike Cero
https://www.miforss.com/2025

Dugsiyada iyo jardiinooyinka waa hantida ugu qiimaha badan ee Mercer Island, laakiin qorshaha la soo jeediyay waa mid khalad noo ah. *Dhibaatada* waa hoos u dhac ku yimid tayada waxbarashada, ma ahan dhismeyaal aan tayadoodu fiicnayn. Sida caddeynta muujinayso, tirada ardayda la diiwaan geliyey waxay hoos u dhacday 14% halka dakhliga uu kordhay 23%. Carruurteena waxay ka yimaadaan qoysas aqoon sare leh oo taageero fiican leh haddana 1 ka mid ah 4 arday ma ahan kuwo si sax ah ugu diyaarsan heer waxbarasho jaamacadeed fasallo xallin ah la'aantood. Degmadu waxay lumisay diiradda. Xalka ay soo jeedisay Degmadu oo ah dhisidda xarumo cusub oo dhalaalaya ma hagaajin doonto waxqabadka ardayga.

*Qorshaha la soo jeediyay wuxuu* mulkiileyaasha leh guryaha dhex dhexaadka ee qiimahooda yahay $2.2 milyan ku kacayaa $1,282 dheeraad ah sannadka koowaad, sida ay qiyaastay Degmadu. Kani waa koror 40% ah marka loo eego culayska canshuurta dugsiga deegaanka ee hadda jirta, taasoo culayska canshuurta ka dhigaysa midka ugu sareeya marka la barbar dhigo degmooyinka dugsiga la midka ah.

*Xalka* waa in dib loogu noqdo mudnaanta agabyada "wanaagsan in la haysto" oo aan lagama maarmaanka u ahayn inay horumariyaan waxqabadka ardayga. "Curaarta waxaa loogu talagalay dhismooyinka, canshuuraha lasoo rogona waxaa loogu talagalay waxbarashada." Curaartaan ma horumarinayso waxbarashada. Waxaa jiray tiro fursado qiimo jaban ah oo loo soo bandhigay Guddiga Dugsiga. Xasuusnow, waxaan kharash garaynay malaayiin doolar oo aan ku samaynay dib u habeyn/ku daritaan waaweyn ee IMS (Dugsiga Dhexe ee Islander) iyo MIHS (Dugsiga Sare Mercer Island)

*Tani waa ballanqaad $165,000,000 ah oo mas'uuliyad darro ah.* Deriskaaga kula codee maya. Aanu waxqabadka ardayga ka hagaajino gudaha!

### Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Bayaanka ka soo horjeedidda waa mid aan run ahaan sax ahayn. Curaartan waa mid maaliyad ahaan mas'uul ah, waa midda ugu yar afarta fursadood ee la tixgeliyey. Canshuuraha dugsigeena ayaa ahaan doona kuwa ugu hooseeya gobolka, iyadoo kordhinaysa canshuurta hantida in ka yar 7%.

Maalgelinta horumarinnada ayaa hadda loo baahan yahay si loo beddelo kaabayaasha duqoobaya, loo bixiyo STEM casri ah iyo goobo waxbarasho oo farshaxan, iyo kor loogu qaado amniga. Sida uu sheegay OSPI (Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada), ardayda Mercer Island waxay ka sareeyaan asxaabtooda Eastside cabbir kasta. Taageer dugsiyadeena iyo ardaydeena cajiibka ah. Ku Codee *Haa*!

### Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Curaartan aadka qaaliga uh ah ma hagaajin doontaa waxqabadka ardayga? Si cad ah waa maya! Waxay bixisaa cusboonaysiin aan muhiim ahayn kuwaas oo aan wax saamayn ah ku lahayn waxbarashada ardayga.

Yaan lagu sirin. Heerarka canshuurteenu ayaa hooseeya sababtoo ah qiimaha hantideena ayaa sareeya. Waxaan ku jirnaa halka ugu sareysa ee maalgelinta ardaygiiba. Runtii, maamulidda maaliyadeed ee degmada ayaa su'aalo la iska waydiinayaa sida lagu muujiyay hoos u dhimmisyadii ay dhawwaan samaysay Qiimeynta Moody's (Moody's Ratings). Maya ugu codee kharashkaan $165,000,000 ah ee aan loo baahnayn.

## Qoraalka buuxa ee Xeerka 19884

XEER bixinaaya u soo gudbinta codbixiyeyaasha u qalma ee Degmada King ee halka doorashada gaarka ah ee lagu qabanaayo Degmada King Abriil 22, 2025, oo ah soo jeedin ku aaddan dib u oggolaanshaha canshuuritaanka canshuurta hantida ee wakhtigeedu dhammaanayso ee ka badan xaddidaada canshuurta ee ku jira cutubka 84.55 RCW, toddoba sanno oo isku xiga laga bilaabo 2026 (2027–2032), ujeeddaduna tahay in lagu maalgeliyo sii wadidda hawlgalka nidaam goboleedka aqoonsiga sawirka faraha ee otomaatigga ah (regional automated fingerprint identification system), sidoo kale loo yaqaano AFIS, kaas oo ilaalinaya goobta dambiyada oo la balaariyay iyo qabashada teknolojiyada aqoonsiga iyo adeegyada dhammaan wakaaladaha caddaaladda dambiyada deegaanka ee Degmada King.

BAYAANKA XAQIIQOOYINKA:

1. Si loo balaariyo loona wanaajiyo adeegyada aqoonsiga xaddidan ee ay bixiyaan hey'adaha fulinta sharciga ee magaalo gaar ah iyo degmada ama heer goboleed, sannadkii 1986 codbixiyeyaasha Degmada King waxay ansixiyeen maalgelinta iibsashada nidaam goboleedka aqoonsiga sawirka faraha ee otomaatigga ah oo la wadaago ("AFIS"), kaas oo isbarbardhigga faraha aan la garanayn iyo faraha la yaqaan. Xogta AFIS ee Degmada King waxa ay keydisaa in ka badan laba milyan oo diiwaanka faraha, in ka badan hal milyan oo diiwaanka calaacasha, iyo ku dhawaad saddex iyo lixdan kun oo goob dambi oo laga soo daabacay ee kiisaska aan la xallin. AFIS-ka Degmada King waa nidaam goboleed oo leh adeegyo barnaamij oo ay heli karaan magaalo kasta iyo aagagga aan la midowga ahayn ee Degmada King.

2. Kombuyuutarka AFIS waxa loo isticmaalaa laba ujeeddo oo waaweyn:

a. In si degdeg ah loo aqoonsado shakhsiyaadka la xiray, loogana hortago in si qaldan loo sii daayo kuwa isticmaala magacyo been abuur ah si ay uga dhuuntaan dammaanadda amarka xiritaanka ama ay u qariyaan diiwaanka dambiyada; iyo

b. In la baaro sawirka faraha iyo calaacasha ee laga soo ururiyay goobaha dambiyada si loo ogaado tuhmaneyaasha aan la garanayn iyo in laga caawiyo xukunnada.

3. Degmadu waxay markii ugu horeysay soo iibsatay kombuyuutarka AFIS-ka ee la wadaago ka dib markii codbixiyeyaasha degmada King ay ansixiyeen canshuurta hantida ee ujeeddadaas ku saabsan oo ahayd bishii Nofeembar 1986kii. Cabbirka warqadda codbixinta waxaa oggolaaday Xeerka 7747. Laga soo bilaabo 1986, codbixiyeyaasha Degmada King waxay sii wadeen inay ansixiyaan adeegga dib u cusboonaysiinta canshuurta hantida ee u dhexeysa $0.0200 ilaa $0.0665 kunkii doolar ee qiimeynta la qiimeeyay sidii loogu baahan yahay si loo taageero, loo kordhiyo, loona casriyeeyo adeegyada AFIS-ka. Taariikhda canshuurta ee barnaamijka AFIS-ka waa:

a. Canshuur cusboonaysiin shan sanno ah ayaa la ansixiyay Nofeembar 1990. Cabbirka warqadda codbixinta waxaa oggolaaday Xeerka 9603;

b. Canshuurta cusboonaysiinta ee shanta sanno ah ayaa la ansixiyay Nofeembar 1995. Cabbirka warqadda codbixinta waxa oggolaaday Xeer 11948;

c. Canshuurta cusboonaysiinta ee shanta sanno ah ayaa la ansixiyay Sebtembar 2000. Cabbirka warqadda codbixinta waxaa oggolaaday Xeerka 13894. Maalgelinta hawlgallada barnaamijka AFIS ee joogtada ah ilaa 2006 iyada oo aan la bixin canshuuritaanka canshuurta hantida ee isku xigta;

d. Canshuur dib-u-oggolaanshaha lix sanno ah ayaa la ansixiyay Sebtembar 2006. Cabbirka warqadda codbixinta waxaa oggolaaday Xeerka 15537. Kharashaadka barnaamijka miisaaniyadda hoose waxa ay u oggolaatay degmadu in ay hoos u dhigto qiimaha canshuuraha ee 2011 iyo 2012;

e. Canshuur cusboonaysiinta lix sanno ah ayaa la ansixiyay Nofeembar 2012. Cabbirka warqadda codbixinta waxaa oggolaaday Xeerka 17381; iyo

f. Canshuur cusboonaysiinta lix sanno ah ayaa la ansixiyay Agoosto 2018. Cabbirka warqadda codbixinta waxaa oggolaaday Xeerka 18674. Iyada oo loo maraayo kharashka muxaafidka ah, degmadu waxay ururisay haraaga sanduuqa, kaas oo sii wadi doona hawlaha barnaamijka AFIS ilaa 2025 iyada oo aan la bixin canshuuritaanka canshuurta hantida.

4. Kombuyuutarka AFIS-ka ayaa markii ugu horeysay la rakibay 1988-kii. Nidaamkiisii u horeeyay ayaa la cusboonaysiiyay 1999, ka dibna lagu beddelay nidaam cusub 2011. Nidaamka cusbaa ayaa markii ugu horeysay ka hirgeliyay Degmada King raadinta sawirka calaacasha. Nidaamka ayaa waxaa la cusboonaysiiyay 2018 oo loo sameeyay hab ku salaysan daruuraha keydinta (cloud-based) kaas oo si joogto ah loo cusboonaysiiyo si loo hubiyo in degmadu isticmaalayso teknolojiyada isbarbardhiggga faraha ee ugu dambeeyay.

5. Canshuurta AFIS-ka ee 2018, oo lagu hirgeliyay qiimo dhan $0.03501 kunkii doolar ee qiimeynta la qiimeeyay, ayaa waxay wakhtigeedu dhammaatay Diseembar 31, 2024. Iyada oo loo maraayo maamul maaliyadeed oo taxaddar leh, haraaga ayaa ku ururay sanduuqa AFIS-ka lixdii sanno ee la soo dhaafay. Haraaga waxa loo isticmaali doonaa in lagu joogteeyo qoondeynta sannadka 2025 iyo sii wadidda hawlaha barnaamijka AFIS-ka iyada oo aan la bixin canshuurta hantida ee isku xigta. Xeerkan waxa uu soo jeedinayaa canshuurta AFIS ee la cusboonaysiiyay oo qiimaheeda dhan yahay $0.0275 kunkii doollar ee qiimeynta la qiimeeyay ee la ururiyay laga bilaabo 2026. Dakhli la'aanteed, haraaga sanduuqa waa la dhimmi doonaa ka dib 2025 maalgelinta barnaamijkana way dhammaan doontaa.

6. Goobaha magaalooyinka waaweyn iyo magaalo weynta ee dalka oo dhan waxa ay xaqiiqsadeen faa'iido ay leedahay inay helaan teknolojiyada AFIS-ka iyaga u gaar ah iyo shaqaale taageera, laakiin inta badan ma awoodaan wakaaladaha booliiska deegaanka ee madaxa banaan. Degmada King waa degmada keliya ee ku taal gobolka Washington oo leh kombuyuutarka AFIS-ka u gaar ah, waana degmada keliya ee gobolka Washington ee leh qaab la wadaago, oo gobol ah oo bixiya adeegyada dhammaan wakaaladaha fulinta sharciga deegaanka. Marka adeegyada, teknolojiyada, iyo macluumaadka laysku saleeyo, habka goboleedka waxa uu taageeraa xallinta dambiyada oo ah kharash hoose oo guud, iyada oo loo maraayo dhaqaale baaxad leh. Faa'iidooyinka kale ee hab goboleedka waxaa ka mid ah xog weyn oo tayo sare leh oo ka dhalata aqoonsiyo badan, iyo xog wadaag badan oo dhex mara wakaaladaha.

7. Sannadkii 2023, barnaamijka AFIS waxa uu baaray ku dhawwaad koow iyo konton kun oo si elektaroonig ah loo gudbiyay diiwaannada faraha waxaana uu aqoonsaday in ka badan laba boqol oo qof oo magacyo been ah bixiyay markii la xiray. Barnaamijku waxa uu ka jawaabay in ka badan saddex kun oo codsiyo ah oo ku saabsan kaalmada goobta dambiga, waxa uu farsameeyay in ka badan shan iyo toban kun oo caddeymo ah waxaana uu aqoonsaday in ka badan shan kun oo daabacaad goob dambi ah. Kombuyuutarka AFIS-ka waxa kale oo loo adeegsaday in lagu baaro ku dhawwaad lix kun oo diiwaanka faraha ah ee ay soo gudbiyeen saraakiisha goobta ku sugan iyaga oo isticmaalaya aaladaha aqoonsiga mobilka.

8. Wakaaladaha caddaaladda dambiyada ee degmada King waxay u arkaan in barnaamijka AFIS uu yahay mid lama huraan u ah fulinta sharciga, waxaana barnaamijka AFIS loo aqoonsaday heerarkiisa iyo adeeggiisa gaarka ah. Qaabka goboleed ee barnaamijku waxa uu siiyay taageero wax ku ool ah oo lagu xalliyo dambiyada dhammaan wakaaladaha caddaaladda dambiyada ee Degmada King tan iyo markii la aasaasay 1988kii. Barnaamijka AFIS ee hadda jira wuxuu bixiyaa adeegyo badan oo la wadaago, oo ay ku jiraan:

a. Iibka, dayactirka, iyo hawlgalka shaqaalaha ee kombuyuutarka AFIS-ka kaas oo keydiya, baaraaya oo bixiya sawirka suurto galka ah ee faraha iyo calaacasha;

b. Iibka, dayactirka, tababarka iyo taageerada shan iyo konton iskaan toos ah, kuwaas oo ah aaladaha faraha laga qaado ee lagu rakibay guud ahaan Degmada King ujeeddaduna tahay ururinta daabacaad tayo sare leh oo laga helo dadka la xiray iyo codsadeyaasha iyo gudbinta si elektaroonig ah si loo helo isbarbardhig degdeg ah oo hufan;

c. Iibka, dayactirka, tababarka iyo taageerada saddex-boqol ee qalabka aqoonsiga mobilka, kaas oo u sahlaya saraakiisha in ay si degdeg ah u baaraan faraha ayagoo goobta jooga, iyaga oo ka caawinaaya saraakiisha si ay u go'aamiyaan in la xiro ama la sii daayo qofka aan la garanayn;

d. Duubitaanka faraha tayada sare leh ee xarumaha xabsiga degmada, iyo baareyaasha faraha oo la heli karo afar iyo labaatan saacadood maalintii iyo toddobaad maalmood ee asbuuca, si loo aqoonsado shakhsiyaadka la xiray;

e. Baareyaasha iyo farsamayaqaannada ka soo ururiya daabacaadaha goobaha dambiyada, u habeeya waxyaalaha caddeynta si kiimiko ah, u xafidda daabacadahaas sawir ahaan, oo ka baara AFIS si ay u ogaadaan tuhmaneyaasha aan la garanayn ama keydiya daabacadaha aan la aqoonsan ee raadinta joogtada ah marka diiwaannada cusub lagu daro nidaamka; iyo

f. Tababar ku saabsan ururinta faraha iyo habeynta goobta dambiyada, iyo taageerada macaamiisha ee dhammaan hey'adaha fulinta sharciga.

9. Lixdii sanno ee la soo dhaafay, barnaamijka AFIS waxa uu sii waday hawl-qabad waxtar leh, waxa uu gaaray hawlkarnimo si loo dhimmo shaqaalaha, waxa la casriyeeyay kombuyuutarka AFIS, waxa beddelay aaladaha MobileID-ga (Aqoonsiga mobilka) ee nolosha dhammaatay, waxa uu beddelay shaybaarka habeynta oo duugoobay iyo xafiisyadii AFIS-ka.

10. Barnaamijka AFIS waxa uu sameeyay dul mar miisaaniyadeed toddoba sanno ah oo leh oo la xiriira saadaalinta dakhliga ee 2026-2032. Canshuurta la soo jeediyay ayaa ku ilaalin doonta adeegyada hadda jira heerka canshuurta sannadka koowaad kaas oo ka hooseeya heerka canshuurta sannadka koowaad ee ay ansixiyeen codbixiyeyaashu 2018.

11. Barnaamijka AFIS waxa uu soo saaraa warbixinno sannadle ah oo si guud loo heli karo kuwaasoo bixiya warar cusub oo ku saabsan hindiseyaasha barnaamijka iyo guulaha la gaaray. Guusha barnaamijka AFIS-da ee goboleed waxa ay ka dhalatay wada shaqeyn joogta ah oo lala yeesho hey'adaha sharci fulinta ee Degmada King.

12. Canshuurta la soo jeediyay waxaa la oggolaan doonaa toddoba sanno.

HA AHAATO MID AY DHAQAN GELINAYSO GOLAHA DEGMADA KING:

<u>QAYBTA 1.</u> **Qeexitaannada.** Qeexitaannada qaybtaan ku jira ayaa khuseeya dhammaan qaraarkan ilaa in mawduuca si gaar ah qaab kale loogu qeexo mooyaane.

A. "AFIS" micnaheedu waa nidaamka aqoonsiga sawirka faraha oo otomaatig ah.

B. "Kombuyuutarka AFIS-ka" micnaheedu waa nidaamka aqoonsiga sawirka faraha ee otomaatigga ah, kaas oo ah nidaamka kombuyuutarka ee aasaas ahaa isticmaala AFIS, iyada oo la adeegsanayo qaab-dhismeedka wuxuu ku daraa keydka xogta kale ee diiwaannada aqoonsiga dambiyada, iyo qalabka la xiriira, teknolojiyada, shabakadaha iyo goobaha ay u shaqeeyaan shaqaale loo tababaray qabashada, keydinta iyo isbarbardhigga diiwaannada aqoonsiga dambiilaha, falanqeynta teknolojiyada guuleysiga.

C. "Barnaamijka AFIS" waxaa loola jeedaa iibsiga, hirgelinta, dayactirka iyo hawlgelinta kombuyuutarka goboleed ee AFIS. "Barnaamijka AFIS" waxa kale oo loola jeedaa dadaalka goboleed oo dhan ee shaqaale tababaran kuwaas oo, iyada oo loo maraayo faraha, calaacalaha iyo hababka kale ee aqoonsiga: aqoonsada dadka la xiray; in la caddeeyo tuhmaneyaasha dambiyada laga bilaabo faraha iyo faraha calaacalaha ee looga tagay caddeymaha goobaha dambiyada iyo meelaha kale; in lagu caawiyo in dambiileyaasha lagu xukumo aqoonsiyadan; tababar sharci fulinta goobta dambi ururinta caddeynta iyo hababka aqoonsiga; in la taageero diiwaannada taariikhda dambiyada oo sax ah oo dhammaystiran; in la sameeyo cilmi-baaris goobeed ujeeddadeedu tahay in lagu wanaajiyo oo kor loogu qaado adeegyada barnaamijka; iyo haddii kale kor loo qaado badbaadada dadweynaha sida waafaqsan xeerkan oo sharcigu oggol yahay.

D. "Canshuurta" waxaa loola jeedaa canshuuraha hantida ee caadiga ah, ujeeddada gaarka ah iyo muddada lagu sheegay xeerkan oo ay oggolaadeen codbixiyeyaasha si waafaqsan sharciga gobolka.

E. "Lacagta Canshuurta" waxaa loola jeedaa caddadka ugu muhiimsan ee lacagta ay soo ururisay canshuuraha, dakhli kasta oo dulsaar ah oo ka soo gala lacagta, iyo dakhliga ka soo baxa maalgelin kasta oo ku meel gaar ah ka dib oggolaanshaha canshuurta.

<u>QAYBTA 2.</u> **U soo gudbinta canshuur bixiyeyaasha.** Si loo bixiyo lacagaha lagama maarmaanka u ah barnaamijka AFIS-ka, golaha Degmada King waa inuu u soo gudbiyaa codbixiyeyaasha goboleed ee u qalma soo jeedinta ah in dib loo fasaxo canshuurta guryaha ee joogtada ah ee dhacday oo ka badan xaddidaada canshuuraha ee ku jira cutubka 84.55 RCW toddoba sanno oo xiriir ah, iyada oo ururinta bilaabanayso 2026, qiimo ah in ka badan $0.0275 kunkii dollar ee qiimaha la qiimeeyay sannadka ugu horeeya ee muddada canshuurta. Caddadka doolarka canshuurta sannadka ugu horeeya waxa ay noqon doontaa aasaaska canshuurta ugu badan ee la oggol yahay ee sannadaha labaad ilaa toddobaad (2027-2032) waa in la xisaabiyaa iyada oo la isticmaalaayo xaddidaada qodobka cutubka 84.55 RCW, sida wax laga beddelay.

<u>QAYBTA 3.</u> **Dabaajiga dakhliga canshuurta.** Dhammaan lacagaha canshuuraha ah ee la ururiyo sida loogu oggolaaday sharcigaan waa in lagu shubaa sanduuqa hoosaadka ee nidaamka aqoonsiga faraha tooska ah oo loo isticmaalo oo keliya kharashyada xaqa u leh ee lagu qeexay qaybta 4 ee xeerkan.

<u>QAYBTA 4.</u> **Kharashyada u qalma.** Haddii ay ansixiyaan codbixiyeyaasha degmada ee u qalma, dhammaan dakhliga ka soo baxa canshuuraha lagu oggolaaday xeerkan waa in lagu bixiyaa kharashaadka barnaamijka AFIS, oo ay la socoto software-ka iyo hawlaha qalabka iyo kharashyada dayactirka iyo kharashyada lagama maarmaanka u ah in lagu bixiyo kharashaadka uu gobolku galay ee loo aanaynayo AFIS canshuurta doorashooyinka. Kharashaadka xaqa loo leeyahay waxaa ka mid ah mushaharka, gunnooyinka, tababarka, agabka xafiisyada iyo shaybaarka, goobta shaqada, alaabta iyo adeegyada qandaraaska, daraasadaha iyo cilmi-baarista la xiriira, maamulka, iyo kharashyada kale ee ku dhaca hawlgalka iyo tayaynta barnaamijka AFIS ee goboleed. Kharashyada goobta shaqada waxaa ka mid noqon kara ijaarka, kireynta, ama iibsashada dhul ama meel dhismo si loogu hooydo teknolojiyada barnaamijka AFIS, shaqaalaha, ama hawlaha shaybaarka.

Kharashyada xaqa u leh waa in ay ku jiraan deynta aan curaarta ahayn iyo kharashyada maaliyadda iyo dib u bixinta kharashaadka aan caadiga ahayn ee uu degmadu galay ka dib taariikhda dhaqan galka xeerkan ee la xiriira barnaamijka AFIS. Canshuurta AFIS waxaa loogu talagalay maalgelin dheeri ah si loo joogteeyo goobta dambiyada ee la balaariyay laguna xiro teknolojiyada aqoonsiga iyo adeegyada iyadoo loo eegayo hab gobol oo la wadaago, taasoo hoos u dhigaysa qiimaha teknolojiyada iyo shaqaalaha iyada oo loo maraayo dhaqaale baaxad leh oo ka dhigaysa faa'iidada ay heli karaan dhammaan hey'adaha. Canshuurtu waa in aanay wakhti kasta bixinin maalgelinta caddaaladda dambiyada guud ama maalgelin barnaamijyada ama ujeeddooyinka aan si kale waafaqsanayn xeerkan.

<u>QAYBTA 5.</u> **Baaqa doorasho gaar ah.** Sida ku cad RCW 29A.04.321, golaha Degmada King wuxuu halkan ugu baaqayaa doorasho gaar ah oo la qabto Abriil 22, 2025. Agaasimaha Doorashooyinka Degmada King waa inuu sababo ogeysiis la xiriira xeerkan sida waafaqsan dastuurka gobolka iyo sharciga guud iyo in loo gudbiyo codbixiyeyaasha degmada ee u qalma, doorashada gaarka ah ee degmada ee la sheegay, soo jeedinta hadda ka dib hore loo wado. Karaaniga goluhu waa inuu ku caddeeyaa soo jeedintaas agaasimaha doorashada ee Degmada King si weyn qaabkan soo socda, iyadoo la raacayo wax ka beddelka sida uu u baahan karo qareenka dacwad oogeyaasha:

Degmada King

Soo Jeedinta Lr. 1

Canshuurta Nidaam Goboleedka Aqoonsiga Sawirka Faraha ee Otomaatigga ah (AFIS).

Golaha Degmada King ayaa meel mariyay Xeerka ____ khuseeya soo jeedintaan ee nidaam goboleedka aqoonsiga sawirka faraha ee otomaatigga ah (AFIS). Soo jeedintaan waxay noqon doontaa >maalgelin sii wadidda hawlgalka barnaamijka AFIS si loo bixiyo teknolojiyada faraha ee la xoojiyay iyo sawirada calaacasha si looga caawiyo maamulka caddaaladda. Waxay oggolaanaysaa canshuurta hantida oo lix sanno oo dheeraad ah ayadoo ururinta laga bilaabi doono sannadka 2026 qiimo ah $0.0275 ka mid ah $1,000 ee qiimeynta la qiimeeyay, ayadoo canshuurta sannadka 2026 lagu salayn doono xisaabinta kordhiska sannadlaha oo ah 3.5% ee sannadaha 2027-2032; iyo lagana dhaafo waayeellada, halyeeyadii hore, iyo shakhsiyaadka naafada ah ee u qalma sida ku cad RCW 84.36.381. Ma tahay in soo jeedintaan la:

Ansixiyo [ ]

Diido [ ]

<u>QAYBTA 6.</u> **Muddo kordhinta guddiga la talinta ee AFIS.** Haddii canshuurta ay codbixiyeyaashu ansixiyaan si waafaqsan qodobka 5 ee xeerkan, guddiga la-talinta AFIS ee ay hore u oggolaadeen codbixiyeyaashu waa in lagu hayaa inay dib u eegaan hawlaha AFIS iyo kharashaadka iyo inay soo jeediyaan talooyinka khuseeya barnaamijka AFIS.

<u>QAYBTA 7.</u> **Ansixinta.** Shahaadaynta soo jeedintaan ee karaaniga golaha Degmada King ee ku socota agaasimaha doorashooyinka sida waafaqsan sharciga ka hor doorashada Abriil 22, 2025, iyo fal kasta oo kale oo waafaqsan maamulka iyo ka hor taariikhda dhaqan gelinta xeerkan waa la ansixiyay oo la xaqiijiyay.

<u>QAYBTA 8.</u> **Kalagoynta.** Haddii wax kasta oo ka mid ah xeerkan ama isticmaalkiisa uu qof ama xaalad uu yahay ama uu noqdo mid aan ansax ahayn, inta ka hartay qaanuunka ama ku-dhaqankeeda ku aaddan dadka kale ama xaaladaha, intuba saamayn kuma laha.

Degmada King

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Qoraalka buuxa ee Xeerka 19884